



Ilaaliyaha Iska-wax-u qabsada ku shaqeyaa ee Booliiska Dugsiga

Bishii Sebtember ee 2002 ayaa laba ka mid ah saraakiisha beesha ee Booliiska waxay aasaaseen unuga Ilaaliyaha Iska-wax-u-qabsada ku shaqeyaa ee Booliiska Dugsiga, iyagoo uu tilmaan-siinayo laba xiddiglaha xukuma. Maadaama ay nabadgelyada ardeydu tahay wax ugu muhimsan ee ay tahay inay qabtaan, muddo bilo kedib ah ayaa cilmi-baadhis la sameeyey. Cilmi-baadhistaas waxaa la rabay in lagu ogaado dugsiyada sida aadka ah ugu baahan Waalidka Ilaaliyaha Dugsiga ka ah. Bishii Disember, barnamij tijaabo ah ayaa laga bilaabay Dugsiga Hoose ee Horton.

Waalidiinta, xubnaha jaaliyada, shaqaalaha dugsiga iyo ardeyda ayaa muujiyey inay daneynayaan nabadgelyada ardeyda saacadaha dugsiga ka hor iyo kedib. Ujeeddada ugu muhiimsan ee Ilaaliyaha Iska-wax-u-qabso ku shaqeyaa waxaa weeyaan inuu indho iyo dhego u noqdo Booliiska Dugsiga iyo maamulka dugsiga arrimaha la xidhiidha nabadgelyada dhammaan ardeyda.

Ilaaliyaha Iska-wax-u-qabsada ku shaqeyaa oo marka la soo gaabiyo loo yeqaano SPVP waxay ka kooban yihiin waalidiin iyo xubnaha jaaliyada ee iska-wax-u-qabso ku shaqeyaa oo qaba midab jaalle guduud ku jiro oo midabkiisu aad u iftiimeyo iyo funaanadaha gacmaha go'an ee leh suunka nabadgelyada ee jaalaha ah iyo firimbi leh laba raadhiyow oo ku xidhan maamulka dugsiga iyo Sarkaalka Adeega Beesha ee dugsiga. Maalin kasta oo dugsiga la dhiganayo qaybo 45 daqiiqo ah oo ka bilaameya nus saac inta aan dugsiga la soo galin ka hor ah iyo nus saac marka dugsiga laga baxo kadib ah, waxay SPVP ka caawisaa Ilaaliyaha Nabadgelyada meelaha ay waddooyinka iska goyaan ee dugsiga ka soo horjeeda, waddooyinka u dhaw iyo wareega kore ee xuddudaha geesaha ku wareegsan.

Waxaa intaas weheliya oo ay qoraan taarikada ama nambarka baabuurta ee xawaaraha badan ku socda, waxayna u sheegaan booliiska dugsiga, kaas oo siineya digniin ama ganaax. Arrintaasu waxay yareynaysaa dhibaataada ka taagan meelaha baabuurta la dhigto iyo weliba kuwa baabuurta xawaaraha badan ku kaxeeya, kuwa baabuurta dhigta meelaha casaanka ah ee manuuca ah, iyo meelaha aan la oggoleyn in baabuurta la dhigto.

Maaha wax lala yaabo dadaalka SPVP oo ah u heellanaanta inay ilaaliyaan nabadgelyada carruurta wakhtiga waxbarashadda dheeraadka ah la qaadanayo dugsiga fasaxa yahay. Waalidiintu waxay sameeyeen nidaam ay ku kala beddelanayaan dhacdooyinka khaaska ah, taas oo dhammaan waalidiinta u fasaxaysa inay feestooyinka dugsiga ku raaxaystaan.

Maadaama SPVP laga hirgeliyey Dugsiga Hoose ee Horton, 10 dugsi oo kale ayaa barnamijkaas bilaabay. Adeegyada Booliiska Dugsiyadu waxay ku kalsoon yihiin in sannad-dugsiyeedka 2004-05 ay 10 dugsi oo dheeraad ah ka qaybgali doonaan. Dhammaadka sannad kasta waxay Adeegyada Booliisku qabtaan xafad ay ku abaalmarineyaan dadkii iska-wax-u-qabsada ku shaqeyey ee hawlkarnimada dheeraadka ah muujiyey.

Inta aysan waalidiinta iyo xubnaha jaaliyadu iska-wax-u-qabso kaga shaqeynin SPVP, waxaa looga baahan yahay inay buuxiyaan arji si loo ansaxiyo, waxaana laga heli karaa shabakada Internetka ee ah http://www.sandi.net/pdf/comm_ntbk.pdf bogga 80aad, waana inaad oggolaataa in baadhitaan lagugu soo sameeyo. Baadhitaankaas lagugu soo sameynayo waxaa ka mid ah in kombiyuutarka lagaa baadho inaan dembi gashay iyo in kale iyo inaad la tashatid sharciga Megan Law. Wixii warbixin dheeraad ah ee ku saabsan Adeegyada Booliiska San Diego, fadlan waxaad boqataa shabakada Internetka ee ah <http://prod031.sandi.net/policeservices/>.

Waxaa lagu daabacay kaalmada laga helay Annie E. Casey Foundation

Somali version: School Police Volunteer Program

Warbixinada kala xidhiidh: Adeegyada Booliiska SDCS: (619) 725-7000 Maamulka (619) 291-7678 Diritaanka

Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 138,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 200 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 18,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta ee fasalada Xanaanada ilaa iyo 12aad. Waxbarashadda degmada waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda.